HEERARKA HELITAANKA CUNTADA

Heerarka hoose, ikhtiyaaro ayaa la bixiyay sida loola tacaalayo cuntada dheeraadka ah. Qaababka heerarka ugu dareeya waxaa weeye qaababka wax ku oolka badan ee loo isticmaalayo ikhtiyaaradaadka ee markaa looga faa'ideeyo in badan ganacsiyada, bulshada iyo deegaanka.

1. **KAHORTAG:** Waxa aad yaraysaa xadiga cuntada qashinka lagu ridayo.
2. **KA BADBAADI:** Waxa aad ka qabataa cuntada kahor inta ayna qashinka gelin si dadku u cunaan.
3. **DIB U BURBURINTA:** Waxa aad cuntada qashinka u wareejisaa cuntada xayawaanka, inaad burburiso, inaad ku shubto anarobik, iwm.
4. **DHULKA QASHINKA LAGU DAADSHO:** Daadin nasiif ah oo amaan ah.



Qashinka cuntadu waxa uu sidoo kale khasaariyaa biyaha, tamarta iyo khayraadka kale ee loo isticmaalamay beerista, ka shaqaynta, dirida iyo kaydinta.

Khasaarinta **1 BOWNDHIS OO HILIB AH** waxa uu la qashin yahay inaad biyaha furto **TUUSHKA OO AY SOCDAAN 6 SAACADOOD.**

WAXA AAD DOON DOONTAA HAY'ADO QAATA CUNTADA AAD KU DEEQDO

Badhtamaha Ohio waxaa weey **hay'ada ku deeqid cunto** oo guriyo badan ah kuwaas oo caawiya barnaamijkaaga iyada oo markaa cuntada geeya hay'ada ugu dhaw ee ka shaqaysa samofalka cuntada Waxa aad ka heshaa ka ugu wanaagsan ee baahidaada buuxinaya iyo sidoo kale tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan samaynta barnaamijka deeqda cuntada oo wax ku ool ah oo amaan ah www.cofwi.org.

Barnaamijka Hadaaga Cuntada Badhtamaha Ohio

Khayraadkani waxaa suurto gelisay Maamulka Qashinka Adkaha ee Badhtamaha Ohio)Solid Waste Authority of Central Ohio, SWACO) iyo 60 hay'adood oo kale oo markaa ay wada shaqeeyaan iyo khabiiro ka socda dhamaan Degmada Franklin kuwaas oo ka kooban Barnaamijyo Hadhaaga Cuntada Badhtamaha Ohio Wadajir, uruurintani ay ka wada shaqeeyaan dawlada iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahayi waxa ay ka shaqeeyaan sidii dib loogu qaban lagaa hadhaaga cuntada kuwaas oo markaa lagu bulshadeena khayraad ahaan.

www.cofwi.org
foodwaste@swaco.org

SWACO
FROM WASTE TO RESOURCES

www.swaco.org

THE CITY OF COLUMBUS
ANDREW J. GINTHER, MAYOR
COLUMBUS PUBLIC HEALTH

www.publichealth.columbus.gov
Khidadaha Nidaamka Cuntada Deegaanka - 614-645-0867

Franklin County Public Health

www.myfcph.org
food@franklincountyohio.gov
614-525-7462

KAYDI WAX KA BADAN CUNTO

FARQI KEEN

MAYDH CUNTADA - KHAYRAAD QASHIN AH

TILMAAMAHA KU DEEQIDA CUNTADA EE XARUMAHA CUNTADA EE LIISANKA HAYSTA

CAAWI BULSHADA IYO DEEGAANKA

Maraykanka, ilaa **boqolkiiba 40 cuntada loosoo saaro inay dadku cunaan ayay khasaariyaan** maqaaxiyuhu. Badhtanka Ohio, waxay ka dhigan tahay in 1 milyan oo bowndhis oo cunto ah loo diro meelaha qashinka lagu qubo maalin kasta. Tukaamada, maqaaxiyaha, iyo ganacsiyada cuntada iyo hay'adaha ayay ka timaadaa boqolkiiba 40 qashinkaasi.

Degmada Franklin, 69 milyan jeer ayayna sanadkii dadka deegaan waxba cunin, hadana waxaa 192 milyan oo cunto ah loo diraa meelaha qashinka lagu qubo. **Inaad cuntada ku deeqdo halka qashin qubka ay ka tegi lahaayeen, waxa aad markaa ku soo afjaraysaa gaajada ka jirta Badhtamaha Ohio.**

In aad cunta ku deeqdaa waxay keeneysaa in la ilaaliyo khayraadka dabiiciga ah. Halkan Badhtamaha Ohio, cuntada qashinka ahi waxaa weeye boqolkiiba 15 qashinka lagu daadiyo meelaha cuntada lagu daadiyo. Tani waxay u dhigantaa wax ka badan 22 milyan oo galaan oo gaas ah, 41 bilyan oo galaan oo biyo ah iyo 160,000 oo eekar oo dhu ah oo markaa wixii la tuuray ay ka buuxaan. Sidoo kale, in lasoo saaraa cunto ka badan inta loo baahan yahay waxa ay sidoo kale ka dhigan tahay in la isticmaalayo nafaqada cuntada, iyo cayayaan buufiye, iyo meelo badan oo la dago oo loo baahno. **Talaabada aad qaadaa waxa ay gacan ka gaysan kartaa in la ilaaliyo dhulka iyo bulshadeena.**

ILAALINTA KHASAARAHA

Hay'ada ku deeqa cuntada waxaa ilaaliya Sharciga Cuntada Bill Emerson Good Samaritan, kaas oo markaa sharci federal ahaan u u dhaqan geley 1996. Hay'adaha ku deeqa cuntada oo markaa siiyaa hay'ada samofalka ah si ay ugu qaybiyaan dadka u baahan wax masuulyad madani ama fal danbiyeed ah kagama yimaado wixii ka yimaada cuntada.

BADBAADINTA CASHUURTA

Sida uu dhigayo Xeerka Cashuurta Federalku, ganacsiyada u qalma waxa ay laga jari karaa wax ka yar oo (a) laba jeer kharashka cuntada lagu deeqayo ama (b) kharashka cuntada lagu deeqay oo lagu daray kala badh faa'idada cuntada laga filanayo hadii lagu iibiyo qiime caadi ah. Waxa aad la xidhiidhaa xirfadlahaaga cashuurta si aad markaa u go'aamiso hadii ay ku munaasab tahay ganacsigaaga.

GARASHADA CUNTADA AAD KU DEEQI KARTO

Xarumaha cuntada ee liisanka haysta waxa ay ku deeqi karaan cuntada aan weli cidna waxba ka cunin, oo ay ku jiraan wixii aan karsanayn, karsan, laga shaqeeyay ama la diyaariyay; barafka; sharaabka; ama waxyaabaha cuntada laga samaynayo ama loogu talo geley in loo isticmaalo gebi ahaan ama qayb kamid ah oo ay dadku cunaan, taas oo sharciga ku xidhan yahay uu yahay inuu shaygu isku dhan yahay. Waxaa kamid ah taas cuntada moorsan iyo cuntada marka hore la diyaariyay.

CUNTOOYINKA LAGU DEEQI KARO:

- ✓ **Cuntada kulul** ee aan weli cidna waxba ka cunin oo markaa heerkulka iyo/ama qabawgooda si wanaagsan loogu ilaashay (entrees, maraq, iwm.)
- ✓ **Cuntada qasaacadaysan** ee aan weli cidna waxba ka cunin oo markaa heerkulka (saandhiwij, wixii yoogarka ah, saladh, iwm.)
- ✓ **Midho** (istaroobari, saladh, basal, tamaandho, xawaashyo, iwm.)
- ✓ **Sharaab** (sharaab, biyaha moorsan, sharaabka liinta, shaah, iwm.)
- ✓ **Wixii moorsan** (baasto qalalan, khudaar qasaacadaysan, iwm.)
- ✓ **Wixii xoolaha laga sameeyay** (kiriimka dhanaan, caano, yoogar, jiis, iwm.)
- ✓ **Hilibka qaydhiin** (hilib, digaag, doofaarm iwm.)

CUNTOOYINKA AAN LAGU DEEQI KARIN:

- x **Cuntada cid hore loogu deeqay** sida cuntada la kariyay ee biifeega la saaray ama cuntada loo guray marti oo markaa lagu soo celiyay ganacsiga
- x **Cuntada waxyeelo soo gaadhay** (ee daadadka, dabka, qiiqu, iwm uu soo gaadhay.)
- x Cuntada **ku jirta daasad miridhay ama weel waxyeelo soo gaadhay**
- x Cuntada ku jirta **weel furan ama dilaacsan taas oo markaa ay** waxyeelo soo gaadhi karto

Hadii cuntada aan lagu keeni karin heerkulka saxda ah, ama u waxyeeloobayso si uun, waa in in markaa la burburiyaa ama la daadiyaa.

AMAANKA CUNTADA

WAXYEELOOYINKA CUNTADA KA IMAN KARA

Cuntooyinka qaar ayaa loo arkaa inay waxyeelo leeyihiin oo markaa ay u baahan yihiin heerkulkooda in la maamulo maadaama oo ay keeni karaan jeermis waxyeelo leh oo markaa ku dhasha hadii aan si wanaagsan loo maareynin. Tusaalayaasha waxaa kamid ah:

CUNTADA HEERKUL AMAAN AH KU HAY

Si aad u xaqiijiso in cuntada aad ku deeqaysaa ay amaan inay tahay, xarumaha ku deeqayaa waa inay u hogaansamaan Xeerka Amaanka Cuntada Isku Midka ah ee Ohio. Ku deeqida cuntada lagu deeqay iyo waxyeelada cuntada ee mustaqbalku waa inay buuxisaa shuruudaha heerkulka looga baahan yahay ee hoos lagu sheegey.

Cuntada qabaw waa inay noqotaa 41°F ama ka hoosaysaa.

Cuntada kulul waa inay noqotaa 135°F ama ka hoosaysaa.

Cuntada kulul ee la qaboojiyay iyo wixii qabaw ee lagu deeqay waa inay ahaataa inta u dhaxaysa 135°F ilaa 70°F laba saacadood gudahood iyo inta u dhaxaysa 70°F ilaa 41°F ama wixii ka hooseeya afar saacadood, isku gayn lix saacadood.



KU SUMADEE CUNTA LAGU DEEQAY

Dhamaan cuntada waa in la calaamadiyaa:

Cunto Lagu Deeqay lib Maaha